

BUUGA I

Inta lagu jiro baaritaanka

HELIDA MAGANGELYO



SOO DHAWWOOW!



Sheekadan waxay ku saabsan tahay afar dhallinyaro — sida adiga oo kale ah.

Waxay si nabad ah ku yimaadeen Yurub ka dib safar dheer.

Qaar ka mid ah dhallinyarada ayaa kelidood yimid. Qaar kalena waxay la yimaadeen qoys. Waxay qabaan su'aalo badan — waxaana ka caawinaya dadka ka shaqeeya meesha ay ku nool yihiin.



Sheekadan sidoo kale adiga ayey ku caawin kartaa!

Waxaad baran doontaa:

- waxa ay ka dhigan tahay **helitaanka magangelyada inta lagu jiro baaritaanka**
- waxa aad filan karto sababta ay muhiimka kuugu tahay inaad ka
- qayb qaadato oo la shaqeyso saraakiisha
- yaa ku caawin kara?

Waxaad akhriin kartaa sheekadan:

- keligaa
- saxiib kula socdo
- ama qof halkan ka shaqeeya






Qaado wakhtigaaga. Waa SAX inaad joojiso oo dib uga soo noqoto mar kale.

Haddii wax ay adag yihiin in la fahmo, **weydii qof kuu sharxa.**

Masuulkaaga, shaqaalaha bulshada ama qareenka ayaa kaa caawin kara.

DHAMAADKA, WAXAAD KA HELI DOONTAA:

-  bog leh macluumaad deegaanka
-  su'aalo xiiso leh
-  meel aad ku qori karto su'aalahaaga iyo inaad ku darto xiriirro waxtarka leh

Carruurta ka yar 18 sano oo keligood yimaada, waxaa loo magacaabi doonaa masuul. Qaar ka mid ah waddamada, masuulka waxaa sidoo kale loogu yeeraa wakiiil. Sidoo kale, qaar ka mid ah waddamada, **codsashada magangelyada** waxaa loo yaqaanaa **codsashada ilaalinta caalamiga ah.**




Ugu dambeyntii, ogow in dhammaan adeegyada lagu bixiyo xarumaha soo dhawaynta ee aad joogto ay yihiin bilaash. Haddii xubin ka tirsan shaqaalaha uu kaa codsado lacag, la hadal sarkaal aad ku kalsoon tahay ama ilaaliyahaaga.

LA KULAN SHAQSIYAADKA SHEKADAAN KU JIRA


Mohamed

Waxaan ahay 17 sano jir. Waan faraxsanahy inta badan. Waxaan jeclahay inaan caawiyo qoyskeyga iyo asxaabteyda marka aan awoodo. Waxaan keligay yimid dhowr toddobaad ka hor waxaana raadinayaa awoowgay. Waxaan xiiseynayaa inaan bilaabo shaqo.



Ahmed

Waxaan ahay 15 sano jir Waxaa ila socday walaashay weyn Jasmine, oo ila jirtay tan iyo markii hooyaday geeriyootay. Waxaan jeclahay inaan waqti la qaato dadka iyo inaan saaxiibo cusub sameeysto. Runtii waxaan jeclaan lahaa inaan ku noqdo iskuulka sida ugu dhaqsaha badan. Waqti xaadirkan, waxaan baranayaa luqadda deegaanka halkan.



Jasmine

Waxaan ahay 24 sano jir Waxaa ila socday walaalkay, Ahmed, oo aan ugu dadaalo sidii ugu wanaagsan ee aan u daryeeli karo. Waxaan nimid dhowaan waxaana isku dayeynaa inaan ku biirno adeerkay oo muddo ku noolaa Yurub. Waxaan jeclahay ciyaaraha waxaana aad ugu fiicanahay kubadda cagta.



Adam

Waxaan jahay 9 sano jir. Waxaan halkan joogaa keligay. Hada, waxaan goaansadey inaan hadlin. Waxaan la soo kulmay waxyabo xun oo badan intaan halkaan imaan kahor. Waxaan u baahanahay waqti ka hor inta aan mar kale hadlin. Laakiin waan caqli badanahay oo waan fahmaa wax walba. Waxaan ahay dhageyste wangsana waxaana rabaa inaan dugsi tago. Waxaan jeclahay dhammaan saaxiibada cusub ee aan illaa hadda samaystay.



Ms Ines

Waxaan ahay masuul ka shaqeeya xarunta soo dhawaynta. Waxaan isku dayaa inaan taageero dhammaan carruurta iyo dhallinyarada codsanaya magangelyada sida ugu wanaagsan ee aan awoodo. Waxaan jeclahay cunto karinta, wayna i farxad gelisaa marka qof walba mashquul yahay oo firfircoon yahay. Jimicsigu wuxuu dhammaanteen naga dhigaa kuwo qaba caafimaad jidheed iyo maskaxeedba.



Mr Fred

Waxaan ahay la-taliye sharci, taasoo ah nooc qareen ah. Waxaan halkan kala shaqeeyaa asxaab badan oo si fiican loo tababaray. Waxaan siiyaa macluumaad iyo taageero dhammaan codsabayaasha magangelyada arrimaha sharciga iyo codsiyada magangelyada. Waxaan jeclahay xirashada funaanado midabo leh oo fariin ku qoranatahy.




Mahad weyn ayaa u sugnaatey dhammaan dhalinyarada codsaday magangalyada ee akhriyay sheekadan ka hor inta aan la daabicin iyo kuwa ka caawiyey in si qurux badan loo dhammeeyo.

Waxay sidoo kale ka caawiyeen doorashada magacyada shaqsiyada waaweyn.

Mahad ayaa sidoo kale u sugnaatay mas'uuliyiinta Malta iyo Netherlands oo taageeray doodaha lala yeeshay dhallinyarada.








INTII LAGU GUDA JIRAY HUBINTA AQOONSIGA IYO AMMAANKA, WAXAAN LA KULMAY SARAAKIISHA BOOLISKA OO I WAYDIYAY SU'AALO...

HAA, IYADOO KU XIRAN MEESHA AAD SOO GAARTO, BOOLISKA XUDUUDAHA AMA ILAALADA XEEBAHA AYAA MAS'UUL KA AH HUBINTAN.



...INTII LAGU GUDA JIRAY HUBINTA CAAFIMAADKA IYO BAAHIDAYDA, WAXAAN LA KULMAY DHAKHTAR IYO SHAGAALE BULSHADA AH.

TURJUBAAN AYAA I CAAWIYAY SI AAN ULA XIRIIRO DHAMMAAN SARAAKIISHA MAADAAMA AANAN FAHMIN LUQADDA



HAA, GOF KASTA WUXUU XAQ U LEEYAHAY TURJUBAAN KU CAAWIN DOONA SI BILAASH AH. SIDOO KALE, QAREEN AYAA SIDAAS OO KALE AH





HADDII AAD KA YAR TAHAY 18 SANO, GAAR AHAAN HADDII AAD KELIGAAGA TIMID, SI DHAQSO AH UGU SHEEG SARAAKIISHA!



TANI WAA MUHIIM SABABTOO AH QOF KA YAR 18 SANO WAXAA LOO TIXGELIYAA ILMO, ILMAHUNA WAXAY U BAAHAN YIHIIN CAAWIMAAD KA BADAN DADKA WAAWEYN.



SARAAKIIL TABABAR U LEH LA SHAQAYNTA CARRUURTA AYAA KULA HADLI DOONA.




HA ISKU DAYIN INAAD GARISO INAAD ILMO TAHAY!




HADDII AAD TIMAADDO ADIGOON HAYSAN WAX DUKUMEENTI AH OO DA'DAADA MUUJINAYA, WAXAA DHICI KARTA IN MAS'UULIYINTU KAA COPSADAAN INAAD SAMEYSO GIIMEYN DA'EED TANI WAA BAARITAAN KAA CAAWIYA IN LA GIIMEYO DA'DAADA.




BUUG-YARAHAN WUXUU SHARXI KARAA QIIMAYNTA DA'DA.



SIDOO KALE, MARKA ILMO KELIGIIS YIMAADO, WAXAA GARAB ISTAAGA QOF WEYN OO SI GAAR AH U TABABARAN OO LOO YAQAAN MASUUL.



QOFKAN AYAA KAA TAAGEERI DOONA DHAMMAAN ARRIMAHA.



BILOWGA, WAXAA LAGA YAABAA INAAD YEELATO MASUUL KU MEEL GAAR AH. 3 TODDOBAAD GUDAHOOD MARKAAD MAGANGALYO CODSATO, MAAMULKA AYAA KUU MAGACAABI DOONA MASUUL JOOGTO AH

MA CODSANAYSAA MAGANGALYO?

DADKU WAXAY MAGANGALYO U CODSADAAN BADANAA SABABO LA XIRIIRA DAGAAL IYO KHATARO KALE OO KA JIRA DALKOODA HOOYO. MARARKA QAAR WAXAY CODSADAAN SABABTOO AH MA LAHA DAL AY UGU YEERAAN HOY, TAASOO MACNAHEEDU YAHAY INAYSAN LAHAYN WADAN. QOF KASTA WUXUU XAQ U LEEYAHAY INUU MAGANGALYO CODSADO, TAASOO SIDOO KALE LOO YAQAAN ILAALIN CAALAMI AH



MARKAA, MAGANGALYO IYO ILAALIN CAALAMI AH MA ISKU MID BAA?



AASAAS AHAAN HAA, LAAKIN WADDAMADA QAAR WAXAA LAGA YAABAA INAY LEEYIHIIN SHARCIYO KALA DUWAN.



HAA... MA BAARITAANNADA KALIYA DADKA CUSUB BAA LOO SAMEEYAA?



MA SHARXI KARTAA BAARITAANNADA, FADLAN?




MAYA, HADDII AAD MUDDO KU JIRTAY WADDAN LAAKIN AADAN HAYSAN WARAAQAHA DEGANAANSHAHA, BAARITAANKU WELI WUU DHICI KARAA. XAALADDAAS, WAXAY SOCOTAA UGU BADNAAN 3 MAALMOOD.



BAARITAANNADA AQOONSIGA IYO AMNIGA, SARAAKIISHU WAXAY KAA CODSAN DOONAAN BAASABOORKAAGA, SHAHAADADA DHALASHADA, AMA DHUKUMANTIYO KALE. HADDII AADAN HAYSAN WAX AQOONSI AH, HA BAQIN. CARRUIR BADAN AYAA YIMAADA IYAGA OO AAN WAXBA HAYSAN.



SARAAKIISHU WAXAY KU WAYDIIN DOONAAN INAAD XAGIIJISO:



WAXAA LAGA YAABAA INAY SIDOO KALE INAY KUWEYDIYAAN:

-SIDAAD HALKAN O GU SOO SAFARTAY, IYO
-HADDII AAD KELIGAAGA SOO SAFARTAY, SAAXIIBO LA SOCOTAY IYO/AMA GOYS LA SOCOTAY.



BAARITAANKA AMNIGA, WAXAY EEGI DOONAAN HADDII AAD DADKA KALE KHATAR KU NOQON KARTO



AAD HALIS KUTAHAY DADKA KALE?



HAA, TUSAALE AHAAN HADDII AAD HORE U DHAAWACDAY DAD AAN WAXBA GALABSAN.

WAXAY GO'AANSAN KARAAN INAY KU BAARAAN, MARARKA QAARNA INAY KAA REEBTAAN TELEFOONKAAGA AMA ALAABO KALE. TANI WAA SI LOO HUBIYO BADBAADADA QOF WALBA. WAY KUU SOO CELIN DOONAAN MARKAAS KA DIB.



MAR WALBA ISKU DAY INAAD LA SHAGEYSO SARAAKIISHA OO XASUUSO...

DHAMMAAN SARAAKIISHU WAA INAY KUGULA DHAQMAAN SI IXTIRAAM LEH. HADDII AYSAN SIDAAS SAMAYN, WAAD CABAN KARTAA. MA TAGAAN WAXA AY TAAS KA DHIGAN TAHAY?



HUBAAL.



CABASHO WAA MARKA AAD QOF U SHEEGTO IN AADAN KU QANACSANAYN SIDA LAGUULA DHAQMAY ADEEG AAD HESHAY, AMA ADEEG AAD AHAYD INAAD HESHO LAAKIIN AADAN HELIN, SAX?

HADDII AAN CABASHO SAMEEYO, MA WAX BAY U DHIMI KARTAA CODSIGEYGA MAGANGELYADA?

MAYA. WAXAAD LEEDAHAY XAQ AAD KAGA CABAN KARTO DARYEEL XUMO. HADDII AADAN HUBIN WAXA LA AQBALI KARO IYO WAXA AAN LA AQBALI KARIN, WEYDII SARKAAL LAGU KALSOON YAHAY, QAREEN JOOGA AMA MASUULKAAGA SI UU KUU SIIYO TALO.

AMA LA HADAL GOYSKAAGA, HADDII AAD LA TIMID.



SIDOO KALE, HADDII LAGU WAYDIIYO SU'AALO ADIGOON XUSUUSAN JAWAABTA, HA BEEN ABUURAN. KALIYA SHEEG INAADAN OGEYN AMA INAADAN XASUUSAN. WEEY KU FAHMI DOONAAN.



XAQIIQ!






XASUUSO, CARRUURTA KELIGOOD YIMAADA WAXAA LA SHIYAA MASUUL KU MEEL GAAR AH OO TAAGEERA.






MASUULKU WUXUU HUBIN DOONAA IN MAS'UULIYINTU KA WARGABAAN BAAHIYAHA ILMAHA SI AY U GAARAAN GO'AANNADA UGU WANAAGSAN EE ILMAHA.



KA DIB BAARITAANKA, MARKA LAGUU RARO MEEL AAD MUDDO DHEER JOOGEYSO, MASUULKU WUU IS BEDDELI KARAA.



MEESHA CUSUB, WAXAAD TAGI KARTAA ISKUL AMA KA QAYB QAADAN KARTAA HAWLO.




SIDA KU SAABSAN BAARITAANKA BAAHIDA, SARAAKIISHA SAMEEYA BAARITAANKAN BADANAA WAA SHAQAALE BULSHO. WAXAY YAQAANAAN SIDA CARRUURTA LOOLA HADLO WAXAYNA DIIRADDA SAARAAN SIDA QOFKU DAREEMAYO.




SIDAAS DARTEED,
U SHEEG HADDII
AAD...

...KA BAQAYSO QOF AMA WAX...



...SI KA DUWAN DADKA KALE LAGUULA
DHAQMAY...



...WAXYELO LAGUU GEYSTAY, HALKAN AMA
WAAGII HORE...



...AAD WELWELSAN TAHAY, MURUGO DAREEMAYSO,
ISKU BULUQ QABTO AMA RIYOYIN XUN LEDAHAY.



MAXAAD UGA JEEDDAA
"AAD U WELWELSAN TAHAY"
IYO "ISKU BULUQ QABTO"?



...UHM... MARKA AAD SOO GAADHO MARKII UGLU HORREYSAY, WAXAAD DAREEMI KARTAA DAAL, CABSII AMA SHAKI. QAAR NAGA MID AH WAXAY ARKEEN WAXYAABO MURUGO LEH, QAAR KALENA WAY KA XISHOON KARAAN INAY KA HADLAAN.



WAXAAN ISKU DAYNAA INAAN ILLOOWNO OO AAN BILOWNO NOLOL CUSUB. WAXAAN YEELAN KARNAA NABARRO JIRKEENA KU YAAL, LAAKIIN SIDOO KALE NABARRO KU YAAL QALBIYADEENA. TANI WAXAY NAGU KEENI KARTAA WALAAC IYO INAANAN FIICNAAN DAREEMIN.




WAXYAABIHII QAAR NAGA MID AH SOO MAREEN AAD BAY U XANUUN BADNAYEN. DADKII AAN KUKALSOONEN BEEN AYEY NOSHEGEEN AMA NAGA FAIDEYSTEN



...OO... QAAR NAGA MID AH WAY WAAYEEN DAD AAN SI DHAB AH U JECLAYN. HADDII AAD LA TACAALAYSO XANUUNKAN, U SHEEG SARKAAL. WAXAA JIRA XIRFADLAYAAL KAA CAAWIN KARA.



HAA, SARAAKIISHU KALIYA WAY KAA CAAWIN KARAAN INAAD DAREENTO SI KA WANAAGSAN HADDII AY OGAADAAN DHIBAATOYINKAAGA.




HAGAAG, MARKA AAN MURUGO DAREEMAYO, MA DOONAYO IN QOF WALBA OGAADO.

SIDOO KALE BAAN AHAY. LAAKIIN WAXA AAD U SHEEGTO SARAAKIISHA WAA QARSOODI.




QARSOODI?



...WAY QARSOONAATAA ILAA AAD OGOLAATO IN LA WADAAGO – TUSAALE AHAAN HADDII AAD U BAAHAN TAHAY INAAD ARAGTO DHAKHTAR.

WAXAA LAGU WAYDIIN DOONAA INAAD SAXIIXDO FOOM OGGOLAANSHO SI LOO MUUJIYO INAAD OGOSHAHAY WADAAGISTA MACLUUMAADKA. AMA WAXAY WEYDIIN KARAAN WAALIDKAA AMA MASUULKAAGA INUU SAXIIXO.



HADDII QOFKU KHATAR KU YAHAY NAFTIISA AMA DADKA KALE, TAAS OO LA MICNO AH INULU DHAAWICI KARO QOF KALE, SARKAALKA WAA INUU TAAS LA WADAAGAA SHAQAALAHA AMMAANKA. SI KASTABA HA AHAATEE, LOOMA OGGOLA INAY WAX LA WADAAGAAN MASUULIYIINTA DALKII AAD KA TIMID.



... UHM... HALKEE BAY DADKA JOOGAAN INTA LAGU JIRO BAARITAANKA?

WAXAAD U BADAN TAHAY INAAD KU SII NAGAATO MEEL U DHOW HALKA AAD TIMID. CAADIYAN, MA AWOODI DOONTID INAAD KA BAXDO AAGGA INTA BAARITAANKU SOCDO.




MA TAQAAN SABABTA?

HAA... SABABTOO AH MAS'UULIYINTU MARKA HORE WAXAY RABAAN INAY NAGA OGAADAAN WAX BADAN OO AY HUBIYAAN IN DADKA IMAANAYA AY CAAFIMAAD QABAAN.



XAQIIQATAN!

MARKA AFARTA BAARITAAN LA DHAMEEYO, WAXAY KU BUUXIN DOONAAN FOOM WIXII AAD U SHEEGTAY, WAXAYNA KULA XAQIJIJIN DOONAAN HADDII WAX WALBA SAX YIHIIN.



HADDII AY WAX SI QALDAN U FAHMEEN AMA QALAD SAMEEYEEN, U SHEEG. WEY ADAG TAHAY IN GADAAL LAGA SAXO.



MAXAA XIGA...?

HADDII AAD CODSATO MAGANGELYO, WAA LAGU DIIWAANGELIN DOONAA, MAS'UULIYIINTUNA WAXAY U BAAHAN DOONAAN WAQTI AY KU GO'AAMIYAAN HADDII AAD U BAAHAN TAHAY ILAALIN IYO INAAD SII JOOGTO AMA AANAD U BAAHNAYN .



HADDII AADAN CODSAN MAGANGELYO, MAS'UULIYIINTA ABAABULAYSA SOO CELINTA AYAA LA WARGELIN DOONAA SI LOO HUBIYO INAAD SI NABAD AH UGU LAABAN KARTO. MARARKA QAARKOOD, SOO CELINTU WAY DIB DHACDAA AMA MA DHACDO. TANI WAXAY KU XIRAN TAHAY XAALADDA SHAKHSIYADEED EE ILMAHA.



WADDANKAYGII WAAN KA SOO TAGAY SABABTOO AH WAXAN KA BAQAYAY IN WAX XUN I SOO GAADHAAN, MARKAASAAN MAGANGELYO CODSADAY.

HAA, MAS'UULIYIINTA KHUSEEYSA WAY KU DIIWAANGELIN DOONAAN SIDA UGU DHAKHSAHA BADAN, UGU DAMBAYNNA IO MAALMOOD GUDAHOOD.

RUN, WAA LA I DIIWAANGELIYEEY WAXAANA LA II SIIYEEY MACLUUMAAD KU SAABSAN HABRAACA MAGANGELYADA IYO JOOGITAANKEYGA HALKAN.




MARARKA QAARKOOD, CODSIYADA MAGANGELYADA WAXAA LAGU EEGAA GOOBTA AY DADKA KU SOO DAGAAN. TAN WAXAA LAGU MAGACAABAA HABRAACA XADKA. CAADIYAN MA KHUSAYSO CARRUURTA KELIDOOD YIMAADA.



EEG, WAA MR. FRED, QAREENKA.



WAXAAN HUBAA INULI KU FARAXSAN YAHAY INULI INOO SHEEGO WAX BADAN OO KU SAABSAN HABRAACA MAGANGELYADA.



MUHIIM AH

Gudaha wadankaan

Mas'uulka qaabilsan baaritaanka waa: _____

Haddii aan codsaday magangelyo, mas'uulka baaritaanka wuxuu ii soo diri doonaa mas'uuliyiinta magangelyada si aan isu diiwaangeliyo. Mas'uulka magangelyada ee dalkaas waa: _____

Magaca ilaaliyahayga inta lagu jiro baaritaanka waa: _____

Waxaan la xiriiri karaa la-taliye sharci oo bilaash ah si aan wax badan uga barto habraaca magangelyada iyo mowduucyada la xiriira. Tani, waxaan kala xiriiri karaa: _____

Haddii aan dareemo welwel, cabsi ama ka baqayo qof, waxaan la xiriiri karaa: _____

Haddii qof halkan ka shaqeeya, sida saraakiisha, la-taliyayaasha sharciga, shaqaalaha bulshada ama masuulkaaga si xun kuula dhaqmaan, cabasho ayaan samayn karaa oo waxaan la xiriiri karaa:

Xaalad degdeg ah, waxaan la xiriiri karaa lambarka ambalaaska _____
ama booliska _____

Akhbaarta kale ee muhiimka ah: _____

KADIS

Waxaan hubinayaa aqoontayda ku saabsan waxa aan ka bartay helitaanka magangelyada inta lagu jiro baaritaanka. Su'aalaha qaarkood waxay oggol yihiin in ka badan hal jawaab.

Sax jawaabaha saxda ah

- 1 Sax afarta box ee qofwalbo la doonayo inuu maro
- a. Baaritaanka faraha weyn
 - b. Baaritaanka aqoonsiga
 - c. Baaritaanka heesta dhookhaga ah
 - d. Baaritaanka baahida
 - e. Baaritaanka caafimaadka
 - f. Baaritaanka amniga
-

- 2 Baaritaanku wuxuu qaadan karaa ilaa 7 maalmood.
- a. Run
 - b. Been
-

- 3 Waxaa laga yaabaa inaan ku sii nagaan karo meesha baaritaanku ka socdo ilaa la dhammeeyo.
- a. Run
 - b. Been
-

- 4 Mas'uuliyiinta baaritaanka uma baahna inay ogaadaan haddii aan ahay ilmo.
- a. Run
 - b. Been
-

- 5 Mas'uuliyiinta baaritaanka looma oggola inay i baadhaan.
- a. Run
 - b. Been
-

- 6 Mas'uuliyiinta baaritaanka waa loo oggol yahay inay hayaan alaabta shakhsiyeed ilaa baaritaanku dhamaado.
- a. Run
 - b. Been
-

- 7 Waxaan xaq u leeyahay masuul ku meel gaar ah haddii aan keligay yimid oo aan ka yarahay 18 sano.
- a. Run
 - b. Been
-

KADIS

8 Haddii aan ka baqayo inaan ku laabto waddankeyga sababtoo ah waxaan u maleynayaa in khatar igu soo fool yeelan doonto, waxaan codsan karaa magangelyo.

a. Run
b. Been

9 Waxaa laiga rabaa inaan bixiyo kharashka taageerada turjubaan iyo qareen.

a. Run
b. Been

10 Mas'uuliyiinta qaabilsan magangelyada waa inay i diiwaangeliyaan 5-10 maalmood gudahood laga bilaabo markii aan codsaday magangelyada.

a. Run
b. Been

Kadiska jawabahooda

Suasha 1: b, d, e, f; Suasha 2: a; Suasha 3: a; Suasha 4: b; Suasha 5: b; Suasha 6: a; Suasha 7: a; Suasha 8: a; Suasha 9: b; Suasha 10: a.

QORAALLO

SOMALI

Buug-yarahan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalka, waxaana keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, EUAA taas oo loogu talagalay dalaalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025

